# Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaharka Leh

MAINE DEPARTMENT OF LABOR
*Bureau of Labor Standards*

Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Maine (PFML) waxa uu bixin doonaa illaa 12 toddobaad oo ah fasax mushahar leh oo ah fasax qoys, fasax caafimaad, fasax badbaado ama fasax la xidhiidha shaqagelinta milateri ee dhaw ee xubin qoyska ah.

Nuqul ah sharciyada dhabta ah iyo fasiraadaha rasmiga ah ayaa onlayn ahaan lagaga heli karaa barta www.maine.gov/paidleave ama adiga oo wacaya 207-623-7900 | adeegsadeyaasha TTY waxa ay wacaan Maine Relay 711.

**Sharciga Maine (Cinwaanka 26, M.R.S.A. § 42-B iyo § 850-1) waxa uu ku waajibiyaa loo shaqeeye kasta in uu ku dhejiyo dhejiskan goobta shaqada meel si fudud looga arki karo.**

Dhejiskan waxa lagaga heli karaa internet ka si bilaash ah waana la koobiyeysan karaa: www.maine.gov/labor/posters/

## Faa'idooyinka

- Faa'iidooyinka waxa la heli karaa muddada fasaxaaga ama 12 toddobaad, kolba ka yar.
- Xaddiyada faa'iidooyinka waxa la go'aamin doonaa iyada oo lagu saleynayo dakhliyadaadii hore waxana xaddigiisa ugu sarreeya lagu xaddidaa celceliska mushaharka toddobaadlaha ah ee heer gobol ee sanadlaha ah ee Maine.

## Sababaha Fasaxa

**Fasaxa qoyska:** Si loo daryeelo qoyska qaba xaalad caafimaad oo halis ah.

**Fasaxa caafimaad:** Daryeelidda qof baahiyihisa caafimaad ee halista ah.

**Fasaxa badbaadada:** In uu badbaado ku sugnaado ama ka caawiyo xubin qoys in ay badbaado ku sugnaato kadib xadgudub ama waxyeello.

**Fasaxa milatariga:** Loogu talagalay xaaladaha degdegga ah ee la xidhiidha shaqagelinta milateri ee dhaw ee xubin qoys.

## Noocyada Fasaxa

**Fasaxa joogtada ah:** Fasaxa aad shaqada ka maqan tahay maalmo ama toddobaaddo muddadiiba mar.

**Fasaxa aan joogtada ahayn:** Fasaxa aad weli shaqaynayso ee aad u baahan tahay inaad wakhti fasax ah qaadato balse aanu ahayn fasax jaango'an maalinkasta ama todobaadkasta.

**Fasaxa la dhimay:** Fasaxa aad weli shaqaynayso balse aad si joogto ah u shaqaynayso saacado intii hore ka yar.

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah la xidhiidh:**

Waaxda Shaqaalaha ee Maine
Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaharka Leh
50 State House Station
Augusta, Maine, 04333-0050
Websaytka: www.maine.gov/paidleave/

## U Qalmitaanka

- Si aad u samayso cabasho, waa inaad ka kasbatay wadar ah lix laab celceliska mushaharka toddobaadlaha ah ee sanadlaha ah ee heer gobol Maine base period kaagii. Base period waxa lagu qeexaa afarta ugu horreeya ee kamid ah shantii saddex-bilood kaalendareed ee aad dhamaysatay. Xaaladaha intooda ugu badan, Waaxda Shaqaaluhu waa ay haysaa macluumaadka mushaharkaaga. Haddii aanay haynin, Waaxdu waxa ay qaadi doontaa tallaabooyin si ay u hesho.

## Ka Jaritaanada Mushaharrada

- Lacagaha faa'iidooyinka ayaa laga jari doonaa mushaharkaaga laga bilaabo taariikhda mushaharka ugu horreeya ee kadib Janaayo 1, 2025.
- Sanadada 2025 illaa 2027, xaddiga kharashka faa'iidada ee lagaa jari doonaa kama badan doono 0.5 boqolkiiba kamid ah mushaharrada. Tusaale ahaan, qofka kasbada $600 toddobaadkii waxa uu faa'iidooyinka ku biirin doonaa wax aan ka badneyn $3 toddobaadkii.

## Macluumaadka Kale ee ay Tahay Inaad Ogaato

- Marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee caafimaad, loo shaqeeyaha ayaa sheegan kara dhibaato aan caadi ahayn duruufaha qaar oo codsan kara fasaxa in loo beddelo wakhti si wadajir ah loogu heshiiyey.
- Loo shaqeeyeyaashu waa inay kugu soo celiyaan booskaagii hore ama boos u dhigma oo leh faa'iidooyin, mushahar iyo xeerar iyo shuruudo shaqo oo u dhigma kaagii hore haddii aad la shaqaynaysay loo shaqeeyahaaga ugu yaraan 120 maalmood oo isku xiga markii aad bilawday fasaxaaga.

Codsiyada faa'iidooyinka waxa la muddeeyay in la qabto laga bilaabo **Maajo 1, 2026**

Waaxda Shaqaalaha ee Maine waxa ay bixisaa fursad loo siman yahay oo shaqada iyo barnaamijyada ah. Kaalmooyin iyo adeegyo dheeraad ah ayaa ay heli karaan dadka naafada ahi marka ay codsadaan.

dib loo eegay 10/24